



HOGOL

Dooqaadky Af Soomaaligy - Maayky - HOGOL Soomaali Maay Newsletter
| **Bil'ly - Monthly** |

Walaa Tirooduung ki jero

- Afyaal Abdullahi Abdurahman Hassang (1-2)
- Dugsileyaa enaa (2)
- Alfafaa AjabLeh (3)
- Ururky Afyaalle ii Dhagangky Soomaali Maay (4)
- Magmaag (5)
- Dhaghanky (5)

Tifaftiry: Abdullahi Sheikh Mahamad

Aasaasy - Founder

Goobty Horumariyoky Afky Maayka (Afmaay Development Center), maay la aasaasy sanadky 2017. Sababty liing aasaasy maaybuwaaha horumariyowky afky ii dhaganky Maayky (Af-Soomaalighy Maayky).

Maay ha dhawaayaanee dhammang dadky ky howling horumariyowky afky-aayow, Af-Maay.

Abdulkadir Abukar Sheikh, Founder Afmaay Development Center (ADC)

Email:

afmaaydevelopmentcenter@gmail.com

Facebook: <https://www.facebook.com/afmaaydevelopment/>

Office: Baidoa, Sheikh , S/Land, Muqdishu i i Örebro, Sweden.



Afyaalky Abdullahi Abdurahman Hassan (Daash) maay ki dhaltheey waana ki koreey Degmatha wangle wiiny daafy Hudurwiiny. Quraangky maay haki baratheey Dugsighy Aaw maalling Birkaang ee daafy Jamee'ada Maynuung.


Dugsighy Hoose Afyaalky maayba haki qaathitheey Wangle wiiny. Yaraantiis, Afyaal Daash maay eed ingjeelaayeey munasapathoo dhaghangky gaar ahaang Dabshidky oo sannad walby liki suubiyy jerii Wangle wiiny usughoo eed ing barathy af gurighy reer Daafeetky.

Dugsigha Dhehe maay haki qaathitheey Bartamaha Hamar. Dugsiga Sarena Banaadir Secondary School Hamar.

Shahaadathiis koowaad maaybaa haku qaathitheey Jaama'adda Umatty Soomaaliyeed usughoo barathy uluunty Suughaanty.

Maay ha naghatheey kihigheengky maamulky CRS Philipines, iyo CRS USA. Afyaal Daash maaybuwaaha, Gudoomiyaaghy Hay'adda Huquuqul Insaangky (MEN FOR PEN: REGGII QALANGKY): (الرجال للقلم) Maay kaloo maamuleeeyee Face-boogagga: 1) Bogga AamineeyArlaadii.(2) Bogga AamineeyArlaadii Group iyo (3) Daash Center For Translations & General Writings.

Afyaal Abdullahi Abdurahman Hassang heesy ii Goboyi bathang bershoo waddani eh, bershoo, siyaasy ii guupaapy wal isku reepoow eh, bershoona jeel eh iyee tiriyy oo ku mid eyiing heestii ingki horreyti oo usu tiriyy billy Janaayo 1991tii



heestaasoo ingki magha dari “Arlaathii”, “Afkeey Asalkeeywu”, “Saafiyow”, “Felek”, “Sahan Jeel”, “Derdaar wekdy leh”, “Aay Dhiig leh”, “Kuruykii Arlaathy”, “Qowsaarkii Arlaathy”, “Dar Allaay Dulmung”, “My-Tirinto”, iyo haano kale eed ing bathang oo inta lahangki koopo korne.

HEESTY DAAH-FURKA EE SUUGHAANTY AFYAAL DAASH”Arlaathii”

Aamineey Arlaadii, ruungkii opoogheey, mal hureeng Asalkiini sharaf amiirshee .
Etheb makaangshee, sapaar opoothiis, dirir opooshee.

Umut aafimaadshee Abrangkoo Aftiingsheey, uursammaang, Iimaangshee aruursinaang.

Ajiiskaa fay ulla haliingtoo usbughaa hariirkoo . Ankaar weelshee eperaa, enjeghaa dhullaawtiis iribtiis gowaangaa.

Ooyi ol ma ragathaaw, obsithi aar mu guthaaw illoo langshee eed miing dareeraaw.

Af-humy bershee Amuushoo malab eh, afaafkoo epedsheey ii imrisheey iilinaathy jerii Erdaalaa tegeey! -.Araddaa ii Owlaadaa iddaa liingki seetheey!.

Aayoowbuwaa maayliing athaapee...?! Iyeeyoowbuwaa iling liingku sheenee?! .

Abriskoo hunduraaw eesliinki daaree...?! Abeesoothoo hergelaaso ood liingki jiidee?! Aboorkoo baryigali ish liinki kaajiyee?!.

Alamtary billaawshee aragteeyaa liki jeethe ilmighaas lagbaathiis agllighaa ki nud .

Idaawaqa’aty geeshee aw aawty meelshee Eleflaa gothong ii ipaaro yaabshee... Aduuny bur-burshee ...Afoow gemboowshee... Ir dumoowsheey ii Olol sahaapeed... Oor(Oow) Ir degoowsheey Alla reepoow marag.

Oghoomoow aawkaa uwoowkaa aaydili...?

Ariireey mathaghaa asaayky aay saari?...?

Owaad jeetho ahbalaa koo dhikeey... Araarkaa bathathi albaabaa kii furee.

Es- Dii –Emoow kah... Ariiroow surung ableytaa ii fileertaa ...Aarmigaa ki duul.

Afyaal Daash heestuung oo qoraal eh maaybaa ki hor akriyijireey haruunty Ururuky la arraayii Dhaqdhaqaaqy Dimooqraadiyadda Soomaaliyeed af qalaqina liingki gorothaaw “Somali Democratic Movement (SDM) 1991tii si usu ing kiyo ing dhaqaajhiyo doghoowty iyoonaay barbaarty ii bulshythy oo dhong inii wal usku reepaang

Hees: Dugsileyaa enaa

Dugsileyaa enaa nuurky i nololy arlaathaa enaa,

Dugsileeyaa enaa jahliga i mugdiga ku banaa fathaanee,

Dugsileeyaa enaa afki aayow abtuganaa fathaanee,

Dugsileeyaa enaa riyoothy i rajaatha arlaathaa enaa,

Dugsileeyaa enaa aluunta i ilmiga ky dedaalnaa fathaanee,

Dugsileeyaa enaa dadkaany i dalkaany wal ing baranaa fathaanee,

Dugsileeyaa enaa waalidkaan i maalimiinty abaalsho ingudnaa fathaany,

Dugsileeyaa enaa dhibky i daruufy wadankeen ku binaa fathaanee,

Dugseeyaa enaa dadki dalkaan dhalashadiis i dhahalshoo lahaayiyaa enaa,

Dugsileeyaa enaa, dhithidkaan i dheecaankaany arlaathy ky dhisnaa fathaany,

Dugsileeyaa enaa dadkaan mid Allow ku weel.

Diyaaring: Abdulkadir Abukar Sheikh

Alfaaa AjabLeh: Ingty maay ku billaawaanee Sheeky Jeel oo si rung e' ing dhiithy oo li magha bati "Alfaaa Ajab leh" maaynaa iniis beddelleey silisly amy osby oo Afyaally iski dhaadhaafsithaayaang. Billiiby Afyaalkoowaa meraasheey laha gilliyee hoo Alla erro

Maaybaa ki billaawithaaseegopy Afyaalky ingki horreeyi oo sheekithy billaawi oo eh langky ar-rinty ki dhiitheey haku billaawity. Afyaal maslah Isaak Boorow may arreey:

Alkungaa hiloow leh, Aaarangaa garoor leh
 Apaaraa boktaal leh, Obsii Ilaaheey leh
 Aayithoo quraanky ii Rungaa edaayow leh, Alfaaa ajab leh
 Ally ingtii uumay, Arlaathy ky nool
 Ingsaangky uniiny, Anjharaathy buupaasy ii
 Ingtiiby qalby lewaa Luku ulaapeey jeelky
 May kuumaagsithaa, Ilaw, Alfaaa ajab leh.
 Uthur goony ewaa, Eghyng ingtii dejiyeey
 Olok ing waayeey, ka agly beeleeey
 Umboo Ing amuuthiyaa, Arlaathy tub eh
 Aniiny muku merinii, Isiing siing qysootheey, Alafaaajableh
 Ising feeyleheeytii, Etheb suubineeytii
 Asaleeyty reewineed, Isir ly tokooraaaw
 Aw ly turaw, Abtirshe luku waayi, Alfaaa ajableh
 Ing eleeyleey, Alylaathiyee weerteey?
 Ilky edooytii, Dhal owliyaadii
 Aayithoo quraanky ii, Ahkaangty diimeed
 Tii lyky ilhaamy, Hangraap abaathiye, Alafaaajableh
 Ing eleeyleey, Alylaathiyee weerteey?
 Afmithooweey, Oor meraasheyti
 Ariiti meertiye, Ereti jhiifteey, Barbaar aruurshe ii
 Erdaalnimy lingky sheegny, Asluubsameey, Alfaaa ajableh
 Ing eleeyleey Alylaathiyeweerteey?
 Ming aaniyaayoo, Amar Ally dhiyeey
 Iimaang lang Leho, Islaangnimy ki abtirsythaaw
 Eped muku guraadimaa, Saparaa ibeersitheey, Alfaaa ajableh
 Arangteey hay deersiyoo, Alfaaa etheeghay
 Jeelky oof belay, Ughul ii tipil, Olming qapoo
 Efy oo etaa, Amal suubung ii, Irid keer qabtoo
 Ally ungku tuugheey Alfaaa ajableh
 Arangteey hay deersiyoo, Aragameey
 Araddiis kang naghateey, Ajanapy ungku haayny
 Orooths roogto, Asar ii hiraap, Aragshyey ka haayo
 Usii dhurooweey, Adkeyy alahaa Alafaaajableh
 Arangteey hay deersiyoo, Owlaad baary ehoo
 Apaalshe guthoo, Ehel is jeeloo,
 Ing il nughulaa Ally ungku tuugheey Alfaaa ajableh
 Arangteey hay deersiyoo, Ulyjeedky edthiyaa
 Ufkulka repay, Alifleytha gooyeey,
 Ingtaa haky af hireey, Alfaaa ajableh Arangteey hey deersiyoo
Aay tiriyeey Maslah Isaak Boorow (Ably kuusow)

Ururky Afyaallee ii Dhaganky Somali Maay” (UADHSM)

Somali Maay Artists and Cultural Organisation (SMACO)

Urur usub oo liingky maga dari ”Uruky Afyaallee ii Dhaganky Somali Maay” oo liky dhawaaqi taariikhdy madii haayti 15 Luliyo 2019, Urukaas oo suubiyeen afyaally, goboyty, dadky tumaaw qalabky musikady, laahingyaal, aqoonyahinny, wariyeyaal ki shal nool dalky ii dibediisby oo ky hadalaaw afk Maayky. Uruky maaybaa gudoomiyaagi ingky horreeyi ing doorideeny Sayid Abukar Jaajuumow, gudoomiye ki higeengny aay liing doorithee Yusuf Hoosow. Maay kaloo jiree hubny badang oo ku tirsan ururka oo shal roogaan wadanky gudasheey i binnaangky. Ururky ujeedidy liing aasaasi maay ethaa inii ki shaqeeyo horumariyoowky sugaanty ii dhagangky afky Maayky iyoonaay ku qeebqaadishoody nebeddy ii helliisiyoowky umutty Soomliyeed. Mar dhow ururky maay weeldhidi doonee shabakad le errow ”www.afyaal.com”. Ururky maay kaloo ha saara doonee heerky ururka oo ha koobo doono dhammaang af guriyaalky ama lahjadoo la hariiro af Soomaaliga Maaky, sida Af-Jiido, Af-Dabare, Af-Gare, Af-Tunny, Af-Ashraf-Merka, iyo Af-Benenadiri. Ururky wey lakula hariiri koree emailky:

afyaalithysomalimaay@gmail.com



Diyaarin: Abdulkadir Abukar Sheikh

Magmaag: Abty ii Inaay apoothingwu:

Magmaagduung maayba tilmaamasee in abty (aathaa waalshee) ii Inaay (aawkaa walaaliis) ley-iing waana filitaayaang higsishy ii muthunaang gaar e' sithy iyooby ungu nahaayaang ama ungu murughaayaang arrignoo walaalyooshoo, arriignoonaa ogyiing is jeelaanty ku dhohooyto iyo ii abtishoo ii inaathyoo. Madduung hoo abtighy ii inaathy luku farhiyo do'aayaayaang qalbishoonaa ki farahee ing ariignooghii walaalyaalshoo sithii ku filithaayeeng ku haleeng. Hoo laaking abtighy ii inaathy li washtiroo dooshoo luku baho amby li humaayo ku nahaayaang ing ariinooghii walaalyaalshoo iyo jeelaayeeng ungu halne sithii yoo sughuthaayeeng ama ku filithaayeeng. Madduung nahoowkaas ku nahaayaang iyo qalbi humaangty yoo li kulumeeng iyee may ki naghatha kortee ariignoo il ama angkaar dibto. Apoothingny maaybuwaaha wal koraad oo Soomaalithy baasoosithaasoo arringoo ii hangraabty uurki leh lukula obsothaaw gaar hang hamiingkii. Magmaagdy maaybaa li mid dhigdeey nahoowky iyoo qalby humaadky abti ii inaay appothing waana eethaa liingku obsothee ankartiyo ama hapaarshoo. Maaybaa jirtee ing maddoo hathoow liiski angkaaraaw "bah abtighaa ii inaatha ki hapaareena"

Diyaaring: Omar Abdulqadir Sheikh Abdurahman

Fasiraad: Abdullahi Sheikh Mohamed

Dgaghinky:

Kang bithy jero Bury wiingwu

Kang mithig jeroona bury yarwu lamaathuby geeaa ku suubsigniing. Kang wiinaagha saabigni. Kang yaroowkin dhifiraa leyi.

Lamaathuby wangtaa liki usee suuqy liki jeeyee.

Hoo li fathoona kang wiinaagha wangty walki dhikithe waana liki rughuthee

Diyaaring: Abdullahi Sheikh Mohamed

Wargiling:

Dooqaadky Hoghol maaybaa ha dhawaayee walaaghii taly ii fikirid ky saabsing hurmariyoky Afky-Maayky: Haniikily hariir: Qofkii haayo, qoraaly, taariikdy, suugaanty Afky-Maayky, aniiki dir:

Eamil. afmaaydevelopmentcenter@gmail.com

Goobty Horumriyowky Afky- Maayky - Afmaay Developmment Center (ADC)

c/o Sydvästsomaliska Riksförbundet I Sverige

Föreningarnas Hus

Slottsgatan 13A, 70361

Örebro, Sverige

Tel. 019-133110

E-mail: sydvast.somaliska@outlook.com



Goobty Horumariyowky Afky Maayky
Dooqaadky Af-Maayky



Hogol



Af-Maay Newsletter

Af-Maay Development Center (ADC)

Email: afmaaydevelopmentcenter@gmail.com

Office: Baidoa, Sheekh , S/Land, Muqdishu i Örebro, Sweden



Goobty Horumariyowky Afky Maayky
Dooqaadky Af-Maayky



Hogol



Af-Maay Newsletter

Af-Maay Development Center (ADC)

Email: afmaaydevelopmentcenter@gmail.com

Office: Baidoa, Sheekh , S/Land, Muqdishu i Örebro, Sweden